



xaqa Alle Addoomada ku leeyahay waa iney caabudaan oo ayna cidna ugu shariig yeelin, xaqa Addoomadu Alle ku leeyihiina waa inuuna cadaabin qofkii aan u shariig yeelin

Mucaad Allaha ka raalli noqdee waxaa laga wariye inuu yidhi: Nabiga ayaan la fuushanaa dameer la dhihi jiray: Cufeyr, markaasuu yidhi: Mucaadoow, ma og tahay xaqa Alle ku leeyahay addoomahiisa iyo xaqa addoomadu Alle ku leeyihiin waxaan idhi: Alle iyo Rasuulkiisaa og, wuxuu yidhi: xaqa Alle Addoomada ku leeyahay waa iney caabudaan oo ayna cidna ugu shariig yeelin, xaqa Addoomadu Alle ku leeyihiina waa inuuna cadaabin qofkii aan u shariig yeelin waxaan idhi: Rasuulka Alloow ma ugu bishaareeyaa dadka wuxuu yidhi: maya ha ugu bishaareyn, yey is dhigane.

[Xadiis Saxiix ah.] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu cadeeyey xaqa Ilaahey ku leeyahay addoomada, iyo xaqa addoomadu Ilaahey ku leeyihiin, xaqa Ilaahay ku leeyahay addoomada waa iney caabudaan keligi oo aanay cidna la wadaajin cibaadadiisa. Xaqa addoomadu Ilaahey ku leeyihiin waa inuusan cadaabin kuwa muwaxidiinta ah ee aan cibaadadiisa cidna lawadaajin Mucaad ka dib wuxuu yidhi: Rasuulka Alloow, ma ugu bishaareeyaa dadka si ay ugu farxaan oo ay ugu bishaaraystaan fadligaa weyn? Nabigu naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee Mucaad wuu u diiday isago ka baqaya in dadku isku haleeyaan warkaas.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65007>

